Nationwide Children's
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Iskaanka Altarasoonka lagu baaro Transcranial Doppler (TCD, Baaritaanka lagu Oggaado Ciladaha Dhiiga Maskaxda)

# Transcranial Doppler (TCD) Ultrasound (Somali)

Carruurta qaba cudurka kansarka dhiiga (sickle cell) waxay halis ugu jiraan xanuunka qalalka. Baaritaanka Transcranial (trans-CRANE-ee-ul) Doppler (TCD) ee la adeegsado Iskaanka Altarasoonka wuxuu gacan ka geystaa in la qiyaaso halistaas. Baaritaanka TCD wuxuu cabiraa xawaaraha uu ku socdo qulqulka dhiiga maskaxda (Sawirka 1 aad).



**Sawirka 1 aad** Baaritaanka waxaa laga qaadaa banaanka madaxa cunugaaga. Waxaa lagu sameeyaa aagga u dhaw dhegta oo loo yaqaan dhafoorka.

- Marka qulqulka dhiiga maskaxdu uu ka badan yahay sida uu caadi ahaan yahay, waxaa jira halis saa'id ah oo la xariirta xanuunka qalalka.
- Carruurta qaba qaar kamid ah cudurka saameeya unugyada dhiiga cas, sida Hgb SS or Hgb S Beta Thalassemia Zero, waa inay maraan baaritaanka TCDs hal mar sanadkii marka da'doodu gaarto 2 illaa 16 sano. Qaar kamid ah carruurta waxay u baahan karaan inay badanaa maraan baaritaanka TCDs si loola socda halistooda.
- Baaritaanka TCDs wuxuu ka caawiyaa dhakhaatiirta iyo daryeel bixiyaasha caafimaadka inay ogaadaan in cunugaagu u baahan yahay in badanaa laga eego cudurka qalalka ama daaweynta kahortagta xanuunka qalalka.

 ©2022, Isbitaalka Carruurta ee Qaranka (Nationwide Children's Hospital) Sii socda…

## Diyaarinta Baaritaanka TCD

- Kahor balanta cunugaaga:
  - U sheeg waxa uu yahay baaritaanka TCD.
  - Si caadi ah ayay waxna u cabi karaan waxna u cuni karaan.
  - Ha siin wax daawooyin ah oo ku keeni karta inay dareemaan hurdo. Waa inay soo jeedaan.
- Waad la joogi kartaa canuggaaga xiliga balanta. Inta aad la joogton:
  - Waa inuusan seexan cunugaaga kana caawi inuu dareemo deganaan. Arrintaan waxay ka caawin doontaa in lagu sameeyo baaritaanka TCD oo sax ah.
  - Usoo qaad cunugaaga wax uu akhriyo ama daawado (asagoon qabin dhegaha wax lagu dhageysto).

## Sida Baaritaanka TCD Loo Sameeyo

Mashiinka baaritaanka TCD waxaa lagu qabtaa banaanka madaxa cunugaaga inta la sameynaayo baaritaanka. Baaritaanka waxa uu qaataa 30 illaa 60 daqiiqadood.



**Sawirka 2 aad** Baaritaanka TCD oo cabiraaya xawaaraha qulqulka dhiiga cunugaaga.

- Qofka qaada baaritaanka iskaanka altarasoonka, ee loo yaqaan dhakhtarka baaritaanka shucaaca, ayaa kareem marin doona madaxa cunugaaga. Jeelkaan/kareemkaan kuma uu dhagi doono dharka. Si fudud ayaa loo masixi karaa.
- Waxay aalad yar saari doonaan, oo loo yaqaan aalada baaritaanka, geesaha madaxa cunugaaga iyo qaybta hore ee madaxa (Sawirka 2 aad).
- Cunugaaga waxaa laga doonayaa inuusan is dhaqaajin inta ugu badan ee macquulka ah (Sawirka 3 aad).

## Baaritaanka Kadib

- Cunugaagu wuxuu dib ugu laaban karaa hawlahiisa iyo cuntada caadiga ahayd ee uu cuni jiray.
- Waa inuusan u baahan daawada xanuun baabi'iyaha ah kadib baaritaanka.
- Kooxda Cudurka Saameeya unugyada dhiiga cas ayaa kula soo xariiri doona si ay kuugu sheegaan natiijada baaritaanka TCD kadib baaritaanka.
- Cunugaagu wuxuu wali halis ugu jiraa cudurka qalalka, xataa haddii uu si joogto ah u sameeyo baaritaanka TCD.



**Sawirka 3 aad** Ilmo gees-gees u jiifa inta lagu sameynaayo baaritaanka.



Sii socda…

## Goorma ayay tahay in la waco 911

**Wac 911 si aad u hesho caawimaad degdeg ah hadda haddii cunugaagu qabo wax astaamo ah oo la xariira cudurka qalalka.**

Callaamadaha qalalka ee joogtada ah waa:

- Suuxdin
- Matag
- Madax wareer daran ama degdega ah
- Isbadel ku yimaada araga
- Dhibaato la xariirta hadalka
- Lama kicin karo qofka
- Laciifnimo ama kabuubyo

## Balamaha Dabagalka ah

- Balanta dabagalka caafimaadka ee cunugaaga waa (taariikhda) ________________ marka saacadu tahay (waqtiga)_________ goobta balanta (goobta) _________________________.
- Filo inaad balamo joogto ah la yeelato dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyaha cunugaaga. Wac dhakhtarkaaga haddii aadan imaan karin balan aad haysato ama aad qabto wax su'aalo ah.